**SHARCIGA Lr. 17 ee 8 Maarso 1971**
**Awooda Maxkamadda Badbaadad Qaranka**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

KADIB markii la arkay Baaqa Kaacanka

KADIB markii la arkay sharciga lamb 67 ee 1 Nofeember 1970 ee khuseeya badbaaada bulshada

KADIB markii la garoowsaday baahida loo qabo in la dhiso hey'ad garsoorka ka tirsan oo yeelan doonta awooda la qoray Sharciga lamb 67

KADIB markii la arkay ansixidda Golaha Sare ee Kacaanka

WUXUU XEERAYNAYAA

Sharcigaan halkaan ku qoran

**Qod. 1**
**Awoodaha**

Maxkamadda Badbaadada Qaranka waxaa loo xilsaaray in ay garsoorto dembiyada ku qoran Sharciga lamb 67 ee 1 Nofeember 1970.

**Qod. 2**
Sharcigaan wuxuu dhaqan geli doonaa isla hadda, waxaan lagu soo daabici dooaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyada Dimuqratiga ee Somaliya.
.

Muqdisho 8 Maarso 1971

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
SG Mohamed Siyaad Barre